

RentHelpMN Caawinta Kirada Xaalada degdega COVID-19 Nidaamka Racfaanka Guriyeynta Minnesota

Haddii laguu diido caawin, waxaa kuu suurtogeli karto inaad ka racfaan qaadatid go'aankaas.

Haddii laguu diido caawin, waa inaad heshaa warqada diidmada qoran oo sheegeyso sababaha diidmada. Gudaha 10 maalmood ee taariiqda warqada diidmada, waxaad codsan kartaa racfaan go'aanka ah adiga oo ku soo dirayo boosto ama fakis racfaankaaga ee Kooxda Barnaamijka RentHelpMN ee:

**RentHelpMN
Document Services Center
1055 American Boulevard, Suite A
Bloomington, MN 55420**

Fax: 952-285-2318

Codsigaan waxaa lagu sameyn karaa qoraal ahaan oo waa inuu ku jiraa magacaaga iyo warbixin xiriirkka si markaas loogu xiri karo koontadaada. I-meelka ma illaalsana oo kuma ogolaan karno racfaanada i-meel ahaan waqtigaan.

Kooxda Barnaamijka RentHelpMN ayaa u xilsaareyso qof shaqaale ah dib u eegida feelkaaga. Haddii, dib u eegida kadib, laguu arko inaad u qalantid lacag bixinta, waxaa laguugu caawinayaa sida ku saleysan waqtiga iyo taariiqda gudbinta codsiga asalka ah iyo helitaanka lacagaha. Go'aanka racfaanka lagu guuleysto ma damaanad qaado lacag bixinta lacagaha.

Haddii diidmada caawinta la xaqijiyo, waxaa laguu soo dirayaan warqad qoran oo go'aanka racfaanka ugu dambeeyo oo dhinaca nidaamka isgaarsiinta, i-meelka ama USPS oo ay la jiraan go'aanka iyo sababaha lagu xaqijinayo diidmada.

Haddii aad ku gudbisid racfaan nidaamkaan, laakin codsigaaga aan looga baaran dagin dhinaca Guriyeynta Minnesota, warbixinta racfaankaaga waxaa la siinayaan wakaalada dowlada deegaanka oo dib u eegida iyo jawaabta sida waafaqsan nidaamkooda racfaanka. Barnaamijyada deegaanka waxaa ku jiro gobolada Dakota, Hennepin, Ramsey iyo Washington sidoo kale sida magaalooyinka Minneapolis iyo Saint Paul.